Maxaad ka taqaanaa dalkaaga

Waxaa Qoray : Xuseen Axmed Salaad

DAABACADII KOOWAAD

2015

Hor dhac

Waxaa mahad leh allah ii suura geliyey inaan soo aruuriyo xogta ku qoran buugaan, intaa kadib:

Buuggan waxa uu xambaar sanyahay xog badan oo isugu jirat taariiqda iyo juquraafiga dalka, iyo dhacdooyin muhiim ah oo ka dhacay dalka, waxa uu ka koobanyahay saddax cutub:

c/koowaad: waa juquraafiga dalka.

c/labaad: taariiq ka hor 1960.

c/saddaxaad : taariiq 1960kii ka dib.

Waxaan rajaynayaa in uu qayb weyn ka ciyaaro ilaalinta iyo faafinta sooyaalka soomaaliya.

Macallin Xuseen Axmed salaad.

Qoraa soomaali ah.

Cutubka koowaad:

juquraafiga dalka soomaaliya.

1) Halka ay dhacdo soomaliya iyo xuduudeheeda.

Soomaliya waxa ay ku taallaa geeska afrikada bari, waxaa xad la leh saddax wodan oo kala ah: itoobiya, jabuuti, Kenya.

Dhinaca bari waxaa ka saran badweynta hindiya, dhinaca galbeed waxaa ka xiga ITOOBIYA, dhinaca koofureed waxaa ka xiga keenya.

Dhinaca woqooyi waxaa ka xiga gacanka cadan, dhinaca woqooyi galbeed waxaa ka xiga, jabuuti.

Soomaaliya waxa ay leedahay 3333km.

2)bedka iyo dadka :

Bedka ama masaaxada soomaaliya waxaa lugu qiyaasaa :638000km oo laba jibbaaran. Dadka ku nool soomaaliya wax tiro koob rasmi ah luguma sameyn muddo ku dhow soddon sano sidaas darteed lama sheegi karo tiro go'an waxaa dadku sheegaan 12000000 oo qof, waa qiyaastii ugu dambeysey sideetameeyadii.

3) Dhul-Beereedka.

Dhulka dalka Soomaaliya ee ku habboon beerashada waxaa sanadii 1985tii lagu qiyaasay dhul ay baaxadiisu gaareyso 8 milyan oo hektar, kaas oo u dhigma 13% bedka dalka oo idil. Balse sababo badan aawadood dhulkaasi ma noqonin mid la beerto oo laga faa'ideysto. Sanadkii 1984tii waxay

soomaalidu beeratay hal milyan oo ka mid ah dhulkaasi beerashada ku habboon.

Taasi waxaa ka sii daran in tirada dhul ee sanad walba sida joogtada ah loo beerto ay tahay mid kuwaasi aad uga sii yar oo lagu qiyaasay 18 000 oo hektar oo kaliya. Dhulkaasi oo intiisa badan ku yaala koonfurta dalka waa dhulka u dhaw labada webi amaba u dhexeeya labada webi.

Waxaa kaloo jiray dhul beerashada ku haboon oo ku yaalla gobollo badan oo dalka ah , inkastoo beerashada dhulkaasi ku xirantahay roobka.

Dalagga ka baxa soomaaliya:

Soomaaliaya waxaa ka baxa dalagyo fara badan sida

- Gallayda.
- Mesegada.

- Digirta.
- Khudaarta noocyadeeda kala duwan.
- Bariiska.
- Suufka.
- Sisinta.
- Iyo kuwa kale oo badan.

Gobollada ay dalagyadani ka baxaan waxaa ka mid ah:

- Sh/hoose.
- Sh/dhexe.
- Bay.
- Bakool.
- Mudug.waxaa aad uga baxa digirta iyo qaraha. Iyo noocyo ka mid ah qudaarta.gaar ahaan bariga iyo koofurta gobolka.

Wax soo saarka kale ee dalka.

Waxaa jira waxyaabo qaali ah oo soo saaro dalkeenu, waxaana ka mid ah:

1) Cusbada ama milixa.

Cusbadu waa macdan qaali ah oo dalkeena laga helo , waxaana isticmaala dhammaan dadka soomaaliyeed iyo woddamada dariska ah.

Cusbada ugu badan waxaa laga soo saaraa magaalada **Xinlebi,** oo ku taalla g/gal-guduud. Waxayna soddon iyo shan km ka xigtaa dhinca galbeed magaalada **Camaara,** Ee gobolka mudug.

Meelaha cusbada laga soo saaro waxaa ka mid ah:

Warshubo g/mudug, iyo **jiicdheere** g/mudug.

2) **Beeyada iyo fooxa:** waa xabag qaali ah oo laga soo saaro dalka , gaar ahaan gobolka bari,

Waxayna dhaqaale badan soo gelisaa dalka.

4**) qaab dhismeedka oogada dhulka soomaaliya.**

Soomaliya inta badan waa dhul dullo ah iyo dooxooyin , dulladu waxa ay ku fadhisaa in ka badan sadax meelood oogada dhulka soomaaliya.

Waxaa jira buuro waawayn oo ku yaalla soomaaliya, waxaana ka mid ah:

- **Surad**. Waana buurta ugu dheer soomaaliya. Waxa ay ku taallaa G/SANAAG.dhirirkeedu waa 2800m.
- **Buurta cal-madow**. Waxa ay kutaallaa G/BARI.
- **Buur hakaba** . bay ayay ku taallaa.

- **Buur ayle**. Bay ayay ku taallaa.
- **Buur shiilo**. Mudug ayay ku taallaa.
- **Burrug**, mudug ayay ku taallaa. Waa buur dheer , waxaa la sheegaa in carabtii xeebaha mudug safarka ku iman jirtey ay ku magacaabeen (burji) oo afka carabiga ah, macneheeduna yahay qasri aad u dheer oo xoog badan.
- **Buurta qabno.**waxa ay kutaallaa gobolka hiiraan.

Waxaa dhulka soomaaliya mara laba wabi oo kala ah juba iyo shabeelle.

Labaduba waxa ay ka yimaadan Itoobiya.

Webiyada Soomaaliya “Jubba & Shabeelle”

Webiyada Jubba iyo Shabeelle waxay ka soo bilowdaan buuraha dalka Itoobiya, halkaas oo ay

weliba ka helaan biyaha ay wadaan intooda ugu badan.

Dhul ahaan waxay webiyadan biyo ka helaan dhul-qabatin baaxaddiisu dhan tahay 540 000 km2, dhulkaas oo ku kala yaala Itoobiya (65%), Soomaaliya (33%) iyo Kiinya (2%).

Labada webi waxaa biyo badan webiga Jubba laakiinse waxaa dherer ahaan dheer webiga Shabeelle oo dhererkiisu lagu qiyaasay fogaan la eg 1200 km .

Labada Webi, oo ku yaala koonfurta dalka, waxay soo dhexmaraan dhulka Soomaali-Galbeed. Webiga Jubba waxa uu ku darmaa Badweynta Hindiya, meel u dhaw magaalada Kismaayo. Halka Webiga Shabeelle ee ku baaba’o dhulka, inta uusan badda gaarin,meel udhow tuulada haawaay.

Dhirirka webiga Shabeelle ee dhulka Soomaaliya wuxuu gaarayaa 630 km. Socodka biyaha Shabeelle, oo aad iyo aad u yar, waa mid aad isku bebedela isaga oo socodka biyihiisu ay xilliyada qaleylka ah gaarayaan 10 m3/s (toban kun oo liitar daqiiqaddii), ayada oo ay mararka qaarkood ay dhacdo in uu webigu qalalo. Xilliyada roobka fiican lehna ay gaarayaan 270 m3/s, ayada oo cabbirkani uu yahay mid laga tixraacaya marka uu webigu marayo magaalada Beledweyne oo ah meesha ugu muhiimsan ee socodka biyaha webiga Shabeelle laga ogaan karo marka uu soo galayo dalka Soomaaliya, magaaladaasi waxay xuduudda u jirtaa dherer lagu qiyaasay 30 km. Isku-celcelis ahaan, socodka biyaha Webiga Shabeele waxaa lagu qiyaasay 75 m3/s.

Xilliyada ay biyaha webiga Shabeelle aadka u badan yihiin waa bilaha Abriil iyo Maajo, iyo bilaha Oktoobar illaa December.

Biyaha webiga Shabeelle waxay wadaan carro ka badan kuwa webiga Jubba, oo socodka biyihiisu ay ku soo labalaabmaan kuwa webiga Shabeelle.

Dhererka webiga Jubba oo guud ahaan gaaraya 800 km, wuxuu dhererka webigaasi ee dhulka soomaalida la eg yahay 580 km. Socodka biyaha webiga Jubba waxaa lagu qiyaasaa inta u dhexeysa 800 m3/s illaa iyo 10 m3/s, iyada oo uu aad u badan yahay is-bebedelka socodkiisa. Meelaha ugu muhiimsan ee laga cabiri jiray socodka biyaha webiga Jubba waxaa ka mid ah magaalada Luuq Ganaane. Isku-celcelis ahaan, socodka Webiga Juba ee sanadkii waa 203 m3/s

Dhirta kabaxada soomaaliya.

Soomaaliya waxaa ka baxa dhir fara badan, waxaana loo ka la qaybiyaa dhir labeero iyo dhir aan la beerin.

Dhirta aan la beerin.

- Qurac.
- Maraay.
- Garas
- Hareeri
- Huyin.
- Bilcil.
- Cadaad.
- Sarmaan.
- Xarar.
- Lebi.
- Fullaay.

- Caday.
- Dhafaruur.
- Miracas.
- Dhirindhir.
- Dhusundhus.
- Hamir.
- Tiin.
- Mareer.
- Laama loodshe.
- Murcud.
- Saleemac.
- Booc.
- Rumasan.
- Maygaag.
- Yaaq.
- Raxanreeb.
- Shillan .

- Gowlalo.
- hohob.
- Dacar.
- Jeerin.
- Jirriqo.
- Qabo.
- Barde.
- Cawska dhalanka loo yaqaan.
- Cawska gubaaga loo yaqaan.
- Daranta.
- Jinawga.
- Jillabka.
- Geedka geesa riyoodka.
- Geedka sadkaxda.
- Dharkayn.
- Dhaddin.

Fg: dhirtu waa ay ka badantahay intaas, maadaama gobollada oo dhan aanan ku soo wareegin iima suura gelin inaan soo aruuriyo dhammaan magacyada geedaha.

5) Ilaha Biyaha soomaliya

Biyaha soomaaliya waa ciriiri,taasina kama iman biyo la’aan ,ee waxa ay ka timid aqoon la’aanta haysa dadka soomaalida, gaar ahaan maamulida iyo soosaaridda biyaha ku jira dhulka hoostiisa.

Intaa waxaa dheer iyadoo biyaha roobka aysan jirin hab loo kaydiyo si looga faa’iidaysto xilliga baahidu jirto. Hadaba waa maxay ilaha biyaha ee soomaaliya?

Waxaa jira ilo kala duwan oo soomaalidu k hesho biyaha. Waxaana ka mid ah:

- Ceelasha.
- Roobka.
- Wabiyada.
- Baraagaha.

Waa Maxay BIYO-LA'AANTA?

(Somali center for water and environment)

Biyo-la'aanta ama biyo-yarida, oo afka qalaad lagu yiraahdo "**water scarcity**" ama (**water shortage**) waxaa asal u ah dhowr qodob oo kala duwan loona kala saari karo kuwo dabiici ah iyo kuwa aanan dabiici aheyn, (kuwo ay dadku sababaan iyo kuwo aysan dadku sababin waxna aysan ka qaban karin):

Qobodaba dabiiciga ah ee sababa biyo-yarida:

- Tirada roobka (low rainfall) oo yar isla markaana uu badan yahay uumi-baxa biyaha

(high evaporation) ayada oo ay sabab u tahay hawada kulul. Arrintani waa mid ku kooban waddamada ay hawadoodu kulushahay sida qaaradda Afrika inteeda badan, Bariga dhexe, qeybo Aasiya ka mid ah iyo latin amerika. Farqiga u dhexeeya roobkii da’ay iyo uumi-baxa, oo ah biyaha dib ugu noqonaya hawada, oo aad u yaraada waxa uu sababayaa in ay hoos u dhacaan biyihii soo hari lahaa.

- Roobkii oo aanan imaanin xiligii uu iman jiray, qasbana in abaar dhacdo(drought). Abaar.

waxyaabaha aan dabiiciga aheyn ee sababa biyo-yarida:

- Tirada dadka oo kororta, sababtana in biyihii la heystay ay dadka oo dhan gaari waayaan. Tirada bani'aadanka ee sii badaneysa maalin walba waxa ay culeys u geysataa kheyraaadka biyaha, waxaana yaraaneysa tirada biyaha ee qof walba ku soo aadeysa. Qodobkani waa midka ugu culey ee xalka loo la'yahay.
- Biyaha oo aan si habboon loo isticmaalin isla markaana aysan jirin hanaan-siyaasadedoo hufan oo biyaha lagu maamulo, tani waa dhibaato ugu waaweyn oo heysata waddamada ay biyo-la'aantu heysato intooda badan (poor management/ lack of policy).

- Ku-soo-qulqulka magaalooyinka (urbanisation) ayada oo laga soo tagayo miyiga, tani waxa ay sii kordhineysaa baahida biyaha ee magaalooyinka iyo shaqaale la’aan ku timaada dhul-beereedka iyo xoolo dhaqashada
- Jaridda iyo xaalufinta keymaha/dhirta (deforestation) si loo helo dhul-beereed ama dhuxul, arrintani oo qeyb weyn ka qaadata yarenta kheyraadka biyaha, waxay sababtaa degaanka oo xumaada (Environmental degradation), iyo nabaad-guur (soil erosion).

- Isticmaalka kiimikada bacriminta (fertilizres) iyo sunta disha cayaanka beeraha (pesticides), si loo kordhiyo waxsoosaarka beeraha, biyaha wasaqda ah ee ka yimaada warshadaha iyo guryaha oo si toos ah loogu shubo webiyada iyo harooyinka (iyaga oo aan la nadiifinin) waxay

dhamaanba sababaan in ay yaraadaan kheyraadkii biyaha. Qashinka iyo wasaqda guryaha, warshadaha, beeraha iyo baabuurta waxay waxyeello weyn u geysteen tayada biyaha (water quality). Ayada oo ay wasaqeynta biyuhu (water pollution) ay tahay dhibaatooyinka ugu waaweyn ee maanta ka jira dunida guud ahaan. Wasaqeyntani waxay hoos u sii dhigeysaa biyihii yaraa.

Fg: soomaaliya biyo la’aan kama jirto, laakiin waxaa jirta maamulid la’aan xagga biyaha ah.

6) Gobolada Iyo Degmooyinka Soomaaliya.

Hadii aad tahay qof muwaadin ah ,baro wadankaaga hooyo inta degmo iyo gobol ee uu ka kooban yahay , waayo qofka waddankiisa aan aqoon waa qof aan abtirsiimadiisa aqoon.

Qoraalkan waxa uu ka koobanyahay magacyada gobollada iyo degmooyinka soomaaliya , kuna salaysan nidaamkii dowladii max,ed siyad barre.

Waana kuwan :

1- **Awdal:-** wuxa uu ka kooban yahay afar degmo oo kala ah :

baki

boorame ,

lug hayo

zaylac

2- Banaadir, oo ah magaalo madaxda muqdisho waxay ka kooban tahay sidaan anigu u hayo 16 degmo waana kuwan

cabdi casiis

boondheere

xamar jajab

xamar weyne

hawl wadaag

heliwaa ama huri waa

hodon

kaaraan

shangaani

shibis

waaberi

wada jir

wardhiigley

yaaqshiid

dharkeynley

dayniile.

FG:hadda g/banaadir waa17degmo.(kaxda)ayaa ku soo biirtay.

3- Bari. oo isaguna wuxuu ka kooban yahay dhowr degmo.

boosaaso: caasimada .

caluula

bandarbeyla

ufayn

waaciya

qandala

qardho

xaafuun

isku shuban

4- Togdheer, oo isaguna ka kooban afar degmo burco, waa caasimada

buuhoodle

shiikh

oodweyne

5- Sool waxa uu isaguna ka kooban yahay afar degmo

laas caanood : caasimada gobolka

caynabo

xudun

taleex

6- Galguduud : waxa uu isna ka kooban yahay sideed degmo.

dhuusa mareeb oo caasimada gobolka ah

cadaado

balanbale

ceelbuur

ceeldheer.

caabud waaq

gal hareeri

7- Hiiraan: waxa uu isna ka kooban yahay shan baladweyne : waa caasimada gobolka

buula barde

jalalaqsi

maxaas.

matabaan

8- Gedo: wuxuu isna ka kooban yahay lix degmo

garbahaarey: caasimada gobolka .

baardheere

beledxaawo

doolow

ceelwaaq

luuq

9- Waqooyi Galbeed : wuxaa degmooyinkiisa ka mid ah.

hargeysa: oo caasimada gobolka ah

ber bera

gebilay

10- Mudug isaguna wuxuu ka kooban yahay

shan degmo

gaalkacayo: oo caasimada gobolka ah

galdogob

xarar dheere

hobyo

jiriiban

11- Shabeelada Dhexe : wuxuu ka kooban

yahay todobo degmo

jawhar : caasimada gobolka .

balcad

mahadaay

cadale

aadan yabaal

warshiikh

ruun nirgood

12- Shabeelada hoose, wuxuu ka kooban yahay

todoba degmo

marka : caasimada gobolka .

afgooye

aw-dheegle

baraawe

kuntiwaarey

qoryooley

sablaale.

Wallawayn.

13- Baay: wuxuu ka kooban yahay shan degmo

baydhabo: waa caasimada gobolka

buurxakabo

diinsoor

qansaxdheere

bardaale

14- Bakool wuxuu isna ka kooban yahay shan

degmo

xudur: waa caasimada gobolka

ceelbarde

rab dhure

tiyeglow

biyooley

15- Jubada dhexe: wuxuu ka kooban yahay afar

degmo

bu'aale :oo caasimada ah

dujuma

jilib

saakow

16- Sanaag : wuxuu ka kooban yahay afar

degmo

ceerigaabo : waa caasimada gobolka

ceel afweyn

laasqoray

badhan

17- Jubada hoose : wuxuu ka kooban yahay

shan degmo

kismaayo : oo caasimada ah

afmadow

badhaadhe

xagar

jamaame

18- Nugaal : wuxuu ka kooban yahay afar

degmo

garoowe : waa caasimada gobolka

dangorayo

ayl

burtinle.

7) dhaqaalaha iyo cimilada.

woddan kasta waxa uu leeyahay dhaqaale, dhaqaalehaasina waxa uu ku tiirsanyahay waxyaabo kala duwan.

Dhaqaalaha soomaaliya waxa uu ku tiirsanyahay:

1) Xoolaha nool oo dadku dhaqdaan, kuwaas oo laf dhabar u ah nolosha soomaalida, gaar ahaan kuwa ree miyiga ah.
2) Beeraha . dhaqaalaha beeraha ma badna waayo dhulka soomaalidu beerato waa dhul baaxad yar, wax soosaarkuna waa waryahay.
3) Dhoofinta xoolaha nool , qudaarta iyo maqaarka.

4) Kalluumaysiga waxa uu qayb ka yahay ilaha dhaqaalaha soomaaliya.

Cimilada soomaaliya:

Soomaliya waa dal leh cimilo wanaagsan oo aan qabowna ahayn , kulaylna ahayn. Waa cimilo dhexdhexaad oo ku haboon nolosha banii aadamka. Waxaa ka da’a roob xilliyada gu’ga iyo dayrta. Xagaagana koofurta ayuu ka da,aa.

Duufaan iyo dabeylo ilaahbaa daah ka saaray, oo kama dhacaan, kama dhaco baraf iyo qabow carqaladeeya nolosha dadka.

Cutubka labaad:

Taariikhda dalka ka hor 1960.

1) Asalka soomaalida.

Marka laga hadlayo asalka soomaalida waa arrin muran badan isla markaana laga qabo aragtiyo kala duwan. Inta badan aragtiyadan waxaa laga soo qaatay qoraallo ay sameeyeen dad aan soomaali ahayn .

Haddaba waxaan halkan ku soo koobayaa aragtiyo kala duwan oo laga qabo arrintan:

b) aragtida koowaad waxa ay sheegeysaa in soomaalidu tahay dadka loo yaqaano kusheetiga,(Cushitic people) oo ku nool qaaradda afrika, gaar ahaan geeska afrika ,dadka fikirkan qaba

ayaa waxa ay daliishanayaan luqadda aan ku hadalno. Taas oo ka tirsan luqadaha koosheetiga ah oo ay ku hadlaan dadka afrika kunool inteeda badan.

Waxaa kale oo daliil u ah bay leeyihiin muuqaalka iyo qaab dhismeedka dadka soomaalida ah, midabka maqaarka, iyo halka ay dadku soomaalidu degganyihiin oo ah taariiq ahaan meel dadka afrikaanku waligoodba deganaayeen kumanaan sano ka hor dhalashadii **Nabi Ciise CS.**

t) aragtida labaad waxa ay sharxaysaa in dadka soo maalidu yihiin carab asal ahaan , lkiin ay u soo haajireen xilli hore geeska afrika iala markaana lafal galeen afrikaankii halkaa ku noolaa.

Dadka aragtidan qaba waxa ay daliil ka dhigteen, dhaqanka , diinta iyo luqadda. Iyo taariiqo ay qoreen carabtii hore.

Aragtidan ayaa waxa ay leedahay in dadka soomaalidu asal ahaan ku hadli jireen luqadda carabiga, lkiin iyaga oo dhex deggan dad aan carab ahayn darteed ayaa luqadoodii si tartiib ah isu bedeshay , oo waxa ay noqatay luqad isku dhaf ah,oo ka kooban af xabashi,afcarabi, sawaaxili, iyo carabi dhawaqiisii la dhalan gediyey.

j)dadka soomalidu waxa ay ka kooban yihiin saddax jinsiyadood oo kala ah: carab, xaamiyiin, zinji.(jareer). Waana taas aragtida, saxda udhow sida dad badani ay qabaan.

Waxaa la leeyahay odaga samaali waxa uu ka yimid dalka yaman , geeska afrika ayuu yimid , waxa uu guursaday gabar xaamiyad ah, waxa ay dhashay sagaalka ilma samaali .

x) Samaale waa boqorkii ka talin jiray dhulka Soomaalida 2500 oo sano ka hor dhalashaddii nabi Ciise cs. waa odayga ku abtirsadaan qowmiyada Samaale oo ku nool Bariga Afrika, Waqooyiga iyo Bartamaha Afrika.

Samaale wuxuu dhalay Sagaal wiil oo kala baha ah:

- Gardheere samaale
- Irir Samaale.
- Mayle Samaale.
- Maqaare Samaale.
- Xamare Samaale.
- Xariire Samaale.
- Yaabur Samaale.
- Gardheere Samaale (waa curadka Samaale).

  Waxaa ka farcamay oo uu dhalay Garjante Gardheere, Riyale Garjante, Mataan Riyaale, oo

isna dhalay Saransoor Mataan.

Ilma Saransoor waa afar oo kala ah: Gaaljecel Saransoor, Dagoodiye Saransoor, Ciise Saransoor iyo Masarre Saransoor.

Irir Samaale oo ay ka soo jeedaan Dir iyo Hawiye. Mayle Samaale oo ka soo farcameen Beesha Xawaadle.

Xamare Samaale oo ay ka soo jeedaan beelaha Reer Xamarka, sida: Gudmanaha, Duruqbaha, Gaameedlaha, Shaanshiyaha, Abakaroow, Reer Sheekh iyo Reer Fiqi

Soo koobid:

Sikastaba aragtidu ha u kala duwanaato ee dadka soomaalidu waa dad soo jireen ah , oo gayiga ay degganyihiin waxbadan ku noolaa , lehna taariiq fog

oo ulaabanaysa NABI CIISE ka hor, qaab dhismeedkeeduna waxa uu ahaa qaab qabiil , ilaa haddana qaab qabiil ayey udhisanyihiin , xataa dowladnimadoodu waxa ay ku dhisantahy,

Muuqaal ahaan soomaalidu waxa ay udhowdahay afrikaan, lkiin dhaqan ahaan iyo diin ahaan waa dad caraba ah.

2) Maamulladii soo maray soomaaliya.

Waxaa jira in soomaalidu lahaan jirtey maamullo u dhisan qaab boqortooyo, ama qaab qabiil, ama qaab diineed, hadab waxaa jira boqortooyooyin soomaalidu lahaayeen ,waxaana ka mid ah kuwan:

- Boqortooyada **ifaat.** macnaha kalimadan waa iftiin, waxa ay aheyd dowlad islaami ah oo xoog badan.

- Boqortooyada **dawaaruu**. Waxay aheyd boqortooyo islaami ah oo samaysantay kadib ifaat.
- **Uraabane.** Wax faahfaahin ah laga ma hayo.
- **Hadiya.** Waxa ay lahayd ciidan xoog badan oo gaaraya ilaa 40000 oo askeri.
- **Sharkhaa .** waxa ay aheyd waxana ay lahayd ciidan iyo fardo tira badan.
- **Baali.** Waxa ay ahayd boqortooyo wayn ooleh ciidan iyo dhaqaale badan.
- **Daara.** Waa mid ka mid ah boqortooyooyinkii soomaalida inkastoo aan faahfaahin badan laga hayn.

3) Soomaaliya iyo islaamka.

Soomaaliya waa meeshii ugu horeysey oo qaaradda afrika kamid ah oo islaamku soo gaaro.

Taasna waxaa caddaynaya oo isku raacsan taariiqyahano badan oo muslimiin ah iyo kuwo aan muslim ahayn.

Waxaa soo gaarsiiyey soomaaliya islaamka saxaabadii u soo haajirtay dhulka xabashida , oo lasheegay inay dhulka soomaalida soo gaareen, kadib dad badan oo ka soo haajray dhulka carabta ayaa soomaliya yimid, waxayna door weyn ka qaateen fidinta diinta islaamka , soomaaliduna waa soo dhoweeyeen.

Taariiqdu marka ay ahayd 139 hijriya waxaa soomaaliya soo gaaray dhor qabiil oo carab ah oo ka

soo haajiray dhulka carabta , kadib markii cabbaasiyiintu qabteen hoggaanka khilaafadii islaamka. Waxaa xigey dhowr kooxood oo muhaajiriin ah, oo degay muqdisho iyo magaalooyin kale, hijrooyinkas waxaa kamid ah hijradii zaydiyiinta oo ku beegneyd sanadkii 122 H, iyo hijradii shiiraaziyiinta oo ka yimid faaris(iiraan) , hijrooyinkaas waxa ay qayb wayn ka qaateen fidinta islaamka, si kastaba islaamku waxa uu soomaaliya soogaaray waqti hore, waxayna islaamka ku qaateen si aan xoog ahayn.

Sababaha keenay in islaamku soomaaliya ku faafo waxaa ka mid ah:

- Dadka soomaalida oo ku hadli jirey luqad u dhow luqadda carabiga , iyadoo dadka qaar ay

qabaan inay asalkii hore luqadda soomaaligu ahayd carabi.

- Ganacsatadii carabta muslimka ahayd oo xiriir adag layeeshay soomaalida.
- Fuqahada iyo culumada oo hammigoodu ahaa in ay faafiyaan diinta islaamka.
- Kadib waxaa qaybta ugu ballaaran ee faafinta islaamka qaatay culumadii soomalida oo dariiqooyinka looyaqaaney,sida suufiyada ,qaadiriyada, axmadiyada, iyo kuwa kale.
- Sababaha waxaa kaloo ka mid ah in dadka soomaalidu markii horeba ey aqbaleen diinta islaamka ayna jacayl badan u hayeen.

4) Irdaha islaamku ka soo galay soomaaliya.

Islaamku sidaan soo sheegnay waxa uu soo gaaray dalka waqti hore, waxa uu ka soogaly soomaaliya laba dariiq kuwaas oo kala ah:

1) Dhanka marin-biyoodka babul-mandab, dadkii muhaajiriinta ahaa oo carabta intooda badan waxa ay ka soo gudbeen marin biyoodkaas, waxa ayna degeen dhamaan qaybaha geeska afrika,waxayna faafiyeen islaamka.
2) Dhinaca woqooyiga afrika. Dad badan ayaa ka yimid woqooyiga afrika kadib markii islaamku soo gaaray, waxa ayna u yimaadeen ujeedooyin ganacsi,iyo kuwo cilmiyeed.

5) Magaalooyinka ugu da,da wayn soomaalia.

Waxaa jira magaalooyin qadiimi ah oo ku yaalla soomaaliya , qaar ka mid ah magaalooyinkaas waxa ay u laabanayaan taariiq fog oo gaaraysa kumanaan sano ama dhowr qarni ugu yaraan.

Magaaloyinkaas waxaa ka mid ah:

- Zaylac.
- Barbara .
- Hobyo.
- Xarardheere.
- Mareeg.
- Cadale.
- War-shiiq.
- Muqdisho.
- Beled wayn.

- Baraawe.
- Marka.

Wax taariiq oo xaddidan lagama hayo xilliga saxda ah oo magaalooyinkaas la aasaasay, laakiin waxaa laysku raacsanyahay in ay yihiin magaalooyin qadiimi ah.

6) Soomaaliya oo shan qaybood loo qaybiyey.

Kadib markii la qoday kannaalka suways waxaa caalamka ree galbeedku dareemeen ahmiyadda ay leedahay barta ay soomaaliya kaga taallo adduunyada, taasina waxa ay kicisay damaca gumaystihii ree yurub oo waddanka qabsaday.

Si kastaba shir ka dhacay Baarliin, waxaa lugu qaybiyey soomaaliya , waxaana loo qaybiyey shanqaybood.

1862 faransiisku waxa uu caddeeyey in uu qabsaday jabbuuti.

1887, laba sano kadib shirkii baarliin, ingiriisku waxa uu caddeeyey inuu qabsaday woqooyiga soomaaliya. Kadib hashiis dhexmaray qabaa'ilka qaar iyo ingiriiska.

1896, talyaaniga waxa uu caddeeyey inuu qabsaday koofurta soomaaliya.

1897, ingiriisku waxa uu koofur galbeed siiyey soomaali galbeed. 28/2/1955, ingiriisku waxa itoobiya gacanta u geliyey gobolka **Howd,** iyada oo la tix raacayo heshiis dhexmaray itoobiya iyo ingiriiska, 1954 kii.

1895, ingiriisku waxa uu si buuxda uqabsaday N.F.D. waa dhulka hadda loo yaqaanno woqooyi bari keenya.

1909, ingiriisku waxa uu sameeye xarriq maamul oo kala qaybisa wabiga jubba iyo gobolka N.F.D.

1925kii , ingiriisku waxa uu sameeyey xuduudka u dhexeeya keenya iyo soomaliya.

1963 kii , markii keenya xornimada qaadatay, dadka gobolka N.F.D. waxa ay dalbadeen madaxbannaani iyo inay ku biiraan soomaalida inteeda kale, laakiin ingiriisku waxa uu ku daray gobolkaas keenya.

1889kii, calanka talyaaniga ayaa laga taagay xeebta magaalada **Hobyo.** Waxaana gumaystaha soo dhoweeyey lana shaqeeyey , suldaan la oran jirey

cali yuusuf.inkastoo dadka deegaanku dagaal joogto ah ku hayeen.

Waxaa kaloo laga taagay magaalada **Caluula.**

7) Dagaalladii soomaalidu la gashay gumaystaha.

Inkastoo soomaalidu aysan lahayn awood u dhiganta awooddii gumaysiga ree yurub, haddana waxa ay u istaageen in ay iska dul qaadaan heeryada gumaysiga, nin han lihi hub ma waayee , soomaalidu waxkastoo ay heli kareen waa ay diyaarsadeen, waxa ayna gaadmo iyo toosba u weerareen gumaystihii meel kastaba ha joogee.

Hadaba dadkii la dagaallamay gumaysiga waxaa ka mid ahaa imam **Axmed Ibraahim Guray.**

Halgankii Axmed Guray.

Axmed guray waxa uu ku dhashay magaalada **Hoobato,** horraantii qarnigii 16aad, A.c .qiyaastii sanadku markuu ahaa 1506, magaaladani waxa ay ku taallaa woqooyiga magaalada Harar. Axmed guray waxa uu ku barbaaray magaalada harar, qur'aanka waxa uu ku bartay isla magaalada Harar, Waxa uu bartay farada fuulka iyo sida qalabka dagaalka loo adeegsado, waxaa kaloo bartay shareecada islaamka.

1542 , waxa uu qabatay hoggaanka ciidamada boqortooyadii **cadal,** oo caasimadeedu ahayd Harar.

Waxa uu dagaallo badan la galay xabashida,

Sanaddii 1528kii, waxaa dhacay dagaalkii (baadqi) oo dhexmaray Axmed guray iyo xabashida,

dagaalkaa waxaa looga adkaatay xabashida , waxa ay uqaylo dirsatay bortaqiiska oo ahayd dowlad xoog badan markaas, waxana uu u soodiray 450 askari oo wota hub casri ah. Taasina waxa ay keentay in xabashidu soo qaado weerar cir iyo dhulkaba ah, waxaana uu geeriyooday 1543kii , iyadoo ay dileen ciidamo xabashi ah oo gacan kahelay boortaqiiska.

Sheikh xasan sheikh nuur,(xasan barsane)

Wodaadkani waxa uu ka mid ahaa culimadii u istaagtay ladagaallanka gumaysihii dalka ku soo duulay, waxa uu dowr wayn ka qaatay abaabulidda dadka soomaaliyeed iyo wacyi gelintooda si ay ula dagaallamaan cadawga.

Waxa uu dhashay 1853kii, waxa uu ku dhashay tuulada **Abaadi** oo hoos tagta, Jowhar.waxa uu halganka billaabay horraantii qarnigii labaatanaad.

Talyaaniga ayaa shiikha ergay u diray si uu xukunka talyaaniga u aqbalo lkiin sheekhu waa diiday.

Dagaalladiisii.

1) Dagaalkii buulo barde.1922.
2) Dagaalkii hiilweyne.1923kii.
3) Dagaalkii jilyaale: 1924kii.
4) Dagaalkii hareerile.1934kii.

Dagaal badan oo xanuun badan u gaystay gaalada sheekhu waxa uu gacanta u galay gumaystaha , waxa ay u soo qaadeen magaalada muqdishu waxa ay geliyeen gaalshire, qol cariiri ah oo sumaysan ,

halkaas ayuuna ku dhintay,taariikhda dhimashada khilaaf ayaa ku jira.

Halgankii sayid max,ed c/lle xasan.

Sayid max,ed inkastoo dadka qaar u yaqaanaan nin beel daajiye ah, oo aad u ilaalin jirey danta qabiilkiisa, iyo urur diimeedkiisa, haddana waxa uu galay liiska halgamayaasha soomaalida, waxana uu dagaallo lagalay gumaysigii dalka haystey.

Waxa uu dhashay 1856kii, waxa uu ku dhashay magaalada qoob-fardood, oo ku taalla meel u dhow buu hoodle.

Waxa uu soo shaac baxay xilligii kacaanka Axmed Caraabi oo masar ka dhashay, iyo kacaankii max,ed axmed al-mahdi oo suudaan ka

dhashay,labada kacaanba waxa ay ka dhan ahaayeen xukunka ajnabiga oo caalamka islaamka haystey , gaar ahaan caalamka carabta.

Waxa uu dagal la galay ingiriiska, faransiiska, talyaaniga, iyo xabashida oo ugu dambeys dagaalka soo gashay.waxaa ka mid ah dagaalladii uu la galay ingiriiska :

- Dagaalkii koonfiil (koofil)1913kii.
- Dagaalkii af bakeyle. 1901.
- Dagaalkii beer dhiga. 1901.
- Dagaalkii cagaarweyne.1902.
- Dagaalkii gedbaale,1904.
- Dagaalkii doolmadoobe.

Sayidku waxa uu ku dhintay magaalada **iimay** 1921kii.

Halgankii S.Y.L.(Somali youth league**) .**

Dadkii halganka gobanimo doonka ka qaybqaatay waxaa ka mid ah xisbiga dhallinyarada soomaaliyeed (s.y.l). aasaasidda ururkan waxa ay waji cusub u furtay halgankii gobonimo doonka , oo awel ahaa mid xoog kali ah lagu raadinayey, lkiin hadda lagu soodaray maskax fayow iyo fikir wax dhisaya. Sikastaba ururkan waxaa la sameeyey15/5/1943kii. Taariiqda miilaadiga ah.

Waxaana magaciisu ahaa S.Y.C. oo laga soo gaabiyey (Somali youth club) naadiga dhallinyarada soomaaliyeed , waxaa lugu dhisay magaalada muqdisho, waxaa aasaasay 13 dhallinyaro oo saamaali ah, qof kasta waxa uu xaq u lahaa inuu xubin ka noqdo xisbigaas, laakiin 1947 xisbigu waxa uu isu beddelay xisbi siyaasi ah,waxaana la

shaaciyey mabaadi’da xisbiga, laakiin marka hore aan ku hormarno magacyada aasaasayaasha.

1) c/qaadir sakhaawe diin- guddoomiye.
2) Yaasiin xaaji cismaan. Xoghaye guud.
3) Xaaji max,ed xuseen xaamud. g/ xigeen.
4) Max,ed xirsi nuur . g/xigeen.
5) Daahir xaaji cismaan.
6) Max,ed cisman baarba.
7) Dheere xaaji dheere.
8) Cali xasan maslax.
9) Max,ed cali nuur.
10) Max,ed faarax hilowle.
11) Xaaji max,ed c/laahi,
12) Huudow macallin cabdullaahi.
13) Cismaan geedi raage.

Ujeedooyinka xisbiga.

Waxaa ka mid ahaa.

- In isticmaarka laga bixiyo dalka.
- In meesha laga saaro qabyaaladda iyo eexda.
- In la baahiyo waxbarashada.
- In la ilaaliyo diinta , ayna tahay waxa kali ah oo dalka lugu xukumayo.
- Ilaalinta danaha dadka soomaaliyeed.
- In la sameeyo soomaliya leh hal calan.

1956 kii waxaa lasameeyey xisbi kale oo layiraahdo **xisbiga waddaniyiinta soomaaliyeed,** ujeedooyinka xisbigaasi kama fogeyn kuwa S.Y,L.

1959kii ,waxaa soo baxay xisbi kale oo la oran jirey **xisbiga midowga soomaaliyeed.**

Si kastaba ha ahaatee S.Y.L. waxa ay fureen woddo cusub oo horseeday ugu dambeys in lagaaro madaxbannani 1960kii.

Cutubka saddaxaad.

1960kii kadib.

26July 1960 kii, waxaa xornimada qaatay gobolladdii woqooyi oo ingiriisku gumaysanjirey, 1, july,1960kii – Xorriyadii koofurta talyaanigu gumaysan jirey, iyo midowgii dadka Soomaaliyeed qaybtii laga soo bilaabo dabayaaqadii qarnigii 19aad ay gumaysan jireen Ingiriiska iyo Talyaanigu.

July 1, 1960: Madaxweynihii u horreeyey ee Soomaaliya waxaa noqday **Aaden Cabdulle Cismaan** (Aaden Cadde), ra;iisul-wasaare waxaa noqday c/rashiid cali sharmake. Aadan cadde

waxana uu madaxweyne ahaa ilaa June 10, 1967, markaas oo doorasho uu madaxweynanimada kula wareegey **C/rashiid Cali Sharmarke.** [Aaden Cadde waxa uu noolaa intii u dhexeysey 1908 ilaa June 8, 2007].

Xilligii xornimada gobollada waxa ay ahaayeen sided gobol,1973-1974kii, ayaa waxaa lugu kordhiyey todoba kale, 1980 kii waxaa la magacaabay saddaxda gobol oo kale oo ah jubbada dhexe, sool iyo awdal.

Jan 1962 - Nelson Rolihlahla MANDELA ayaa u mahad celiyey afar wadan oo ay ka mid tahay Soomaaliya. Mandela waxa uu ka khudbaynayey shirkii Pan-African ee lagu qabtay Addis-Ababa, asagoo u mahad celiyey afar dal ee Afrika xilligaas ka mid ah dalalka xorta ah, kuwaas oo kulankaas

joogey, kuwaas oo ahaa **Somalia, Ethiopia, Sudan iyo Tanganyika**. Waxana uu Mandela dalalkaas uga mahad celiyey sida ay cunaqabataynta siyaadadeed iyo mid dhaqaale u saareen dawladdii markaas midab takoorka ku haysatey Koofur Africa, iyo sida ay dalalkaasi magan gelyo u siiyeen qaxootiga reer Koofur Afrika.

June 10, 1967: Waxaa Soomaaliya madaxweyne ka noqday C/Rashiid Cali Sharmarke. October 15, 1969 ayaa la diley C/rashiid isagoo booqasho ku maraya Laascaanood. [C/rashiid Cali Sharmarke waxa uu noolaa intii u dhexeysey 1919 ilaa October 15, 1969].

Oct 21, 1969 - Inqilaabkii loo bixiyey 'inqilaabkii aan dhiigu ku daadan" ayaa ka dhacay Soomaaliya,

waxaana sidaas xukunka ku qabsaday **Jenaraal Maxamed Siyaad Barre.**

10 jannaayo, 1970kii waxaa keligii taliyihii Siyaad Barre sameeyey maxkamadii badbaada oo xukumi jirtay xukunka dilka si looga takhaluso dadka aan taageersanayn madaxweynaha.

21 Oktober 1970kii wuxuu Siyaad Barre ku dhawaaqay in Somaliya qaadatay nidaamka hantiwadaaga cilmiga ku dhisan

Xagaagii 1972kii waxaa la sameeyey ciidamadii guulwadayaasha oo ujeedadoodu ahayd inay cabburiyaan oo xabsiga u taxaabaan dadka shacbiga ah oo lagu tuhmo inay kacaan-diid yihiin.

July 1972kii waxaa la dilay labadii Jenaraal ee Salaad Gabayre, iyo Max,ed caynaanshe oo ka tirsanaa saraakiishii inqilaabka dhigay. Salaad gabayre wuxuu ahaa madaxweyne ku xigeen. Waxaa lagu xukumay dil, ka dib markii lagu eedeeyey inay maleegayeen shirqool ay xukunka kaga tuurayaan Max,ed Siyaad Barre.

25kii golaha sare ee kacaanka.

Golahan wuxa uu ka koobnaa 25 xubnood oo uu gudoomiye u ahaa **Jalle Maxamad Siyaad Barre,** waxayna kala ahayeen:

1. Gen. Maxamed Siyaad Barre (Militeri)

2. Gen Jaamac Cali Qorsheel (Boolis)

3. Gen. Maxamed Ceynaanshe Guuleed(Militeri)

4. General Xuseen Kulmiye Afrax (Boolis)

5. Gen. Salaad Gabeyre Kediye (Militeri)

6. Gen. Maxamed Cali Samatar (Militeri)

7. Gen. Cabdalla Maxamed Faadhil(Militeri)

8. Cali Mataan Xaashi (Militeri)

9. Col. Axmed Maxamuud Cadde (Boolis)

10. Col. Maxamuud Mire Muuse (Boolis)

11. Col. Ismaaciil Cali Abokar (Militeri)

12. Col. Axmed Suleymaan Cabdalla(Militeri)

13. Col. Maxamed Sheekh Cusmaan(Boolis)

14. Col. Maxamed Cali Shire (Militeri)

15. Col. Maxamuud Geele Yuusuf (Militeri)

16. Col. Faarax Waceys Duule (Militeri)

17. Col. Axmed Maxamuud Faarax(Militeri)

18. Col. Axmed Xasan Muuse (Militeri))

19. Col. Cabdirisaaq Maxamed Abuuka(Militeri)

20. Col. Bashiir Yusuf Cilmi (Militeri))

21. Col. Cadulqaadir Xaaji Maxamed(Militeri)

22. Col. Maxamed Cumar Jees (Militeri)

23. Col. Cusmaan Maxamed Jeele (Militeri)

24. Col. Muuse Rabiile Good (Militeri)

25. Cabdi Warsame Isaaq (Militeri)

Oct 21, 1972: Waxaa si rasmi ah loo qoray Afka Soomaaliga oo wixii xilligaas ka horeeyey aan qornayn, balse Soomaalidu weligood ku hadli jireen.

Jan 23, 1975 - Culimo Soomaaliyeed ayaa ka dhiidhiyeen sharci ay soo rogtay xukuumadii Siyaad Barre ; sharcigaas oo ka hor imaneyey Qur'aanka **(*Xukunka Allah*).** Maadaama ay dadka Soomaaliyeed oo 100% muslim sunni ah u cuntami weydey xukunkaas ayey culimadu gadoodeen; waxaana loogu jawaabay in toban culimadii ka mid ah lagu xukumay dil; waxaana culimadaas Muqdisho lagu toogtay 23/1/1975.

Dilkii culumada soomaaliyeed iyo magacyadooda.

Halkan waxaan idiin kusoo gudbinayaa tobankii caalim ee dilka uu ku xukumay madaxweynihii hore Maxamed Siyaad bishii January 1975.

10-ka wadaad oo kaliya ***dambigoodu*** ahaa inay ku adkaysteen in Ilaahay (SW) uunan xagga DHAXALKA ka simin ragga iyo dumarka, ayaa 17kii bishii January 1975 laga qabqabtay masaajidda magaalada Muqdishu salaaddii Jimcaha ka dib.

Lix cisho kadib, 23kii January 1975 ayaa culumadaa lagu laayey meel fagaaro ah.

Waxayna kala ahaayeen:

1 – Sheekh Axmed Sh. Maxamed

2 – Sheekh Muuse Yuusuf

3 – Sheekh Axmed Iimaan

4 – Cali Xasan Warsame

5 – Xasan Ciise Iley

6 – Maxamed Siyaad Xirsi

7 – Cali Jaamac Xirsi

8 – Aadan Cali Xirsi

9 – Saleebaan Jaamac Maxamed

10- Yaasiin Cilmi Cawil

April 9, 1978 - Waxaa dhicisoobey Inqilaab lala maaganaa in lagu rido xukuumadii Siyaad Barre. Waxaana la toogtey 17 kamid ahaa ragii inqilaabka lagu tuhmay oo uu kujirey Col. Maxamed Sheekh Cismaan oo ahaa ninkii hogaaminayey Inqilaabka. Xilligaas ayuu C/Laahi Yuusuf ka baxay Soomaaliya maadaama uu kamid ah raggii ku jirey

fulinta Inqilaabkaas. [Inqilaabku wuxuu ku qorshaysnaa inuu dhaco April 12, 1978, laakiin wuu ka soo hormaray oo wuxuu dhacay taariikhdu markay ahayd April 9, 1978 waana uu dhicisoobay.

Sept 1978 - Col. Cabdullaahi Yuusuf ayaa asaasay mucaaradkii ugu horeeyay ee taariikhda dalka soomaaliya, waa jabhadii (SSF) taas oo bishii October 1981 isu bedeshey (SSDF).

Janaayo 30, 1984: Weerar diyaaradeed oo lala beegsaday Boorama waxa lugu xasuuqay 37 arday oo da'doodu udhaxaysay (6-14)sano iyo 4 macallin, halka dhaawucuna kor u dhaafay 39 arday iyo 5 macalin , waxaa kaloo dadka ku nafwaayay weerarkaas kamid ahaa 4 hooyo oo xaamilooyin ahaa kuwaasi uu sugnaa MCH-ka....

(waa arrin murankeedu badan yahay) lkiin dowladdii xilligaas ayaa eedeeda leh.

Aug 7, 1990 - Jabhadihii SNM (oo la saasay April 1981), USC (oo la asaasay 1989) iyo SPM (oo la asaasay March 1989) ayaa u midoobey sidii ay u tuuri lahaayeen xukuumadii Siyaad Barre.

Jan 27, 1991 - Siyaad Barre ayaa ka baxay Caasimada Soomaaliya ee Muqdisho, waxaana qabsaday jabhado ku kacsanaa dowladda.

Warshadihii soomaaliya.

Wershadaha Soomaaliya in kasta oo aysan aad u fara badnayn, hadana waxaa lagu qiyaasay in ay dhaqaalaha waddanka ku siyaadin jireen boqolkiiba-toban [10%]. Qaybo kamida wershadihii Soomaaliya iyo xilliyadii la asaasay waa kuwan hoos ku qoran:

Warshedda Sonkorta Jawhar:

1919 ayaa shirkad talyaani asaastay warshadda sonkorta ee Jawhar, Sanadkii 1960 kii ayaa warshaddaas 50% kamida loo ogolaaday Soomaaliya.

Warshadda Cusbada Xaafuun:

1922 ayaa shirkad Talyaani ah asaastay warshadda cusbada [solar Salt production].Warshaddaasi waxay soo saari jirtey cusbo dhan 250,000 ilaa 300,000 tons sannadkii.

Warshedda Caanaha Xamar:

1965 ayaa warshadda caanaha ee xamar shaqa bilawday. Wax soosaar keeduna wuxuu ahaa 10.000 litir oo caano ah maalintii.

Warshedda Hilibka Kismaayo:

1968 ayaa la dhamaystiray warshadda hilibka ee kismaayo. Waxayna qali jirtey sannadkii 60,000 neef oo lo’ah, si ay u soo saarto 20 million oo hilib qasacadaysan ah.

Warshedda Kalluunka Laasqoray:

1969 ayaa la dhamaystiray Warshadda Kalluunka ee laasqoray. Waxayna shaqo ku bilawday 5,000 tons oo qasacadood oo Toono ah sannadkii.

Warshedda Dharka Balcad:

1969 ayaa la dhamaystiray warshadda dharka ee Balcad. Waxayna soo saari jirtey dhar kala noocnooc ah, khaas ahaan dharka dugsiyada.

Warshadda Sokorta ee Mareerey (Juba Sugar Project -JSP) 1980-kii.

1976-dii ayaa la calaameeyey oo la bilaabay dhismihii warshadda iyo mashruuca Sokorta ee Mareerey. Mareerey waxay ku taal degmada Jilib ee gobolka Jubbada dhexe, dhanka maaliyadda dowladii Soomaaliya waxay kala kaashatay dalka Sacuudiga iyo Dubey, halka dhanka farsamada lala kaashaday dalka Ingiriiska.

03.09.1980 kii ayaa xarigga laga jaray warshaddii sokorta ee Mareerey waxaana loogu talogalay inay sannadkii soo saarto 70 kun oo tons oo sokor ah.

Waxaa kamid ah warshadaha kale ee dalka:

Warshadda Birta ee Xamar,

Warshadda Sigaarka iyo Tarraqa ee Xamar,

Warshadda Baastada ee Xamar,

Warshadda Shamiitada ee Berbera iyo kuwo kale.

Jaamacadda lafoole.

Jaamacada Lafoole waa jaamacad wax laga baranjirey, waxaana la furay sanadkii1965tii, waxaana magaca loo yeelay 1973dii, iyada oo markii hore ahayd xarun 2 sano lagu tababaro shaqaalaha Dawladda , gaar ahaan maamulka iyo maaraynta iwm.

Qaybaha Jaamacada Lafoole

Arday aad u badan ayay Jaamacada Lafoole soo saari jirtay sanad walba. Waaxyaha Jaamacada Lafoole waxaa ka mid ahaa:

1. Georgraphy
2. History
3. Mathematics
4. Physics
5. Chemistry
6. Biology
7. Business
8. Economics

Arday gaareeyso 1300 arday, ayaa sanad walba ka qalin jabin jirtay Jaamacada Lafoole oo dhacda 22KM galbeed wadada Xamar iyo Afgooye u dhexaysa. Deegaanka Lafoole wuxuu ka tirsanyahay Degmada afgooye, Shabeellaha Hoose.

Maalmaha waddaniga ah oo loo dabbaaldego

1. 26kii Juun 1960kii xornimadii gobolada somaliland.

2. 1dii Luuliyo 1960kii midoobidii Gobolada waqooyi iyo Koonfur.

3. 1dii luuliyo 1960kii xornimadii Gobolada koonfureed.

4. 12ka Abriil maalinta xooga dalka Soomaaliyeed.

5. 8da Maarso maalinta haweenka Soomaaliyeed.

6. 20kii Diseembar maalinta ciidanka booliska soomaaliyeed

7. 27kii Juun 1977kii xornimadii dalka Jabuuti.

8. 15kii Maajo 1943kii aasaaskii ururka S.Y.L

9. 17 Abril maalinta dhirta soomaaliyeed.

10. 21 Nofeembar maalinta macalinka soomaaliyeed.

11. 14kii Febraayo 1974tii Soomaaliya waxay ku biirtay Jaamacadda carabta.

12. 20 Nofeembar maalinta ardayda soomaaliyeed.

Burburkii dowladdii max,ed siyaad ka dib.

Nov 17, 1991 - Awood ku dagaalankii u dhexeeyey qabqablayaasha dagaalka ee Maxamed Faarax Caydiid iyo Cali Mahdi Maxamed ayaa isu rogey

dagaal. Kumanaal shacab ah ayaa ku dhintay dagaalkaas.

March 3, 1992 - Qabqablayaashii iska soo hor jeedey ayaa wada saxiixday heshiis xabbad joojin ah oo ay soo abaabushey Qaramada Midoobey, laakiin waxay qabqablayaashu ku heshiin waayeen sida loo maaraynayo xabbad joojinta.

April 24, 1992 - Golaha ammaanka ee Qaraamada Midoobey ayaa ogolaaday in Soomaaliya loo diro 50 qof oo korka ka ilaaliya xabbad joojintii la kala saxiixday iyo Siyaad Barre oo dalka isga baxay.

Sept 19, 1992 - Qabqablaha dagaalka ee Maxamed Faarax Caydiid oo ku laabtay Muqdisho, isla mar ahaantaasna diidey in la keeno ciidamada nabad ilaalinta.

Dec 3, 1992 - Golaha ammaanka ee Qaramada Midoobey ayaa go'aamiyey in Soomaaliya loo diro ciidamo hubaysan oo nabad ilaalin ah oo uu hogaaminayo Maraykanku.

Dec 9, 1992 - Ciidamada Badda ee Maraykanka oo caga dhigtay xeebta Muqdisho, ayagoo watay magacii ahaa "*Hawlgalkii Rajo soo celinta*".

Jan 15, 1993 - Wadahadal ay soo qaban qaabisay Qaraamada Midoobey oo lagu qabtay Addis Ababa, ayaa maleeshiyooyinkii iskaga soo hor jeedey Soomaaliya ay ku kala saxiixdeen heshiis ay ku joojinayaan dagaalka, heshiiskaas oo kamid ahaa heshiisyo badan oo ay kala saxiixdeen.

May 4, 1993 - Maraykanka ayaa hoggaaminta ciidamadii hawl galka ka wadey Soomaaliya ku wareejiyey Qaramada Midoobey.

Oct 3, 1993 - Sideed iyo toban ka tirsan ciidamada Maraykanka iyo hal askari oo Malaysian ah ayaa la diley, waxaana la dhaawacay 74 Maraykan ah kaddib markii Muqdisho lagu soo ridey labo helicompter oo Maraykanku leeyahay, meydkii askarta la dileyna lagu jiidey wadooyinka Muqodisho. Waagii dambe arrintas waxaa laga sameeyey filim la baxay "*Black Hawk Down*".

March 28, 1994 - Hawlgalkii Maraykanku ka wadey Soomaaliya ayaa si rasmi ah loo soo afjaray.

Jan 2, 1995 - Maxamed Siyaad barre ayaa ku geeriyoodey magaalada Lagos, Nigeria. [Siyaad Barre wuxuu noola aintii u dhexaysey 1919 ilaa January 2, 1995]

Feb 28, 1995 - Ciidamada badda ee Maraykanka iyo ciidamada Talyaaniga ayaa ka qayb qaatay daad

gurayntii ciidamadii Qaramada Midoobey lagga daad gureeyey Soomaaliya.

Aug 1, 1996 - Maxamed Faarax Caydiid ayaa u dhintay dhaawac soo gaarey. (Caydiid waxa uu noolaa intii u dhexeysey December 15, 1934 ilaa August 1, 1996).

1997 / 1998 - Jariidad kasoo baxda dalka Talyaaniga oo lagu magcaabo *Famiglia Cristiana* ayaa daabacday qoraalo xiriir ah oo si waadax ah u faahfaahinaya eedaymo la xiriira sunta lagu duugay Soomaaliya oo ay jariidadu magcawday labada shirkadood ee kala ah *Achair Partners* (Swiss), iyo *Progresso* (Italian). Baaritaankaas jariidada waxaa ka dambeeyey in *European Green Party* ay warbaahinta u soo bandhigeen isla mar ahaantaasna ay baarlamaanka Yurub u gudbiyeen

nuqullo kamid ah heshiis ay kala saxiixdeen labadaas shirkadood iyo nin matalayey "madaxweynihii maamulkii Muqdisho markaas" Cali Mahdi Maxamed, heshiiskaas oo ahaa in Soomaaliya lagu duugo sun [*toxic waste*] miisaankeedu dhan yahay 10 million tonnes, taas oo looga beedeshey $80 million oo doolar. Ilaa xilligaas wixii ka dambeeyey **Cali Mahdi** waxa uu diidanaa in uu arintaas ka hadlo, in kasta oo baarlamaanka Talyaanigu baaritaan dambe oo uu sameeyey uu ku cadeeyey in heshiiskaasi dhacay.

Heshiiskaasi wuxuu dhacay December 1991, waxaana **Cali Mahdi Maxamed** "maamulkisii" u saxiixay "Wasiirkiisii Caafimaadka" Nuur Cilmi CUsmaan (Nur Elmy Osman). Waxaana qorshuhu ahaa in sannadkiiba Soomaaliya lagu duugo sun miisan keedu dhan yahay 500,000 tons.

May 2, 2000 - Shir Soomaalida lagu heshiisiinayey ayaa ka bilowday **Tuulada Carta** ee Dalka jabuuti, shirkaas oo ay ka qayb galeen in kabadan 2,000 oo Soomaalida hoggaamiyayaasheeda ah.

Aug 13, 2000 - Waxaa dhidibada loo taagey dawladii kumeel gaarka ahayd, dawladaas oo la siiyey muddo saddex sano ah in ay heshiis ka dhex dhaliso dadka Soomaaliyeed. Waxaa dawladaas madaxweyne u noqday **C/Qaasim Salaad Xasan,** ra'iisul wasaarena **Cali Khaliif Galayr**.

June 5, 2001 - Maxamed Cawaale Liiban oo ahaa ninkii sameeyey calanka Soomaaliya ayaa ku geeriyoodey magaalada Toronto ee dalka Canada.

May 3, 2002: Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal ayaa ku geeriyoodey magaalada Pretoria ee dalka South Africa. Cigaal waxa uu noqday ra'iisul wasaaraha

Soomaaliya intii u dhexeysey 26kii June 1960 ilaa 12kii July 1960.sidoo kale xilligii c/rashiid. [Cigaal waxa uu noolaa intii u dhexeysey August 15, 1928 ilaa May 3, 2002].

Oct 15, 2002 - Shirkii 14aad ee nabadaynta Soomaaliya ayaa ka furmay magaalada **Eldoret** ee dalka Kenya.

Sept 15, 2003 - Waxaa lagu heshiisey axdiga kumeel gaarka ah ee Soomaaliya iyo in dawlada la dhisayo ay cod-bixin dalka Soomaaliya ku gaarsiin doonto muddo shan sanadood ah, taas oo ku xigtay markii uu dhammaaday waqtigii saddexda sano ee dawladii hore ee kumeel gaarka ahayd. Dawladan cusub waxaa loo bixiyey DFKMG (Dawlada Federaalka Kumeel gaarka ah).

Aug 2004 - Waftiyadii ka qayb galayey shirka Soomaalida uga socdey Kenya ayaa doortay 275-xildhibaan, kuwaas oo lagu soo xulay hab qabiil oo loo bixiyey 4.5.

Oct 10, 2004 - Baarlamaanka FKMG ayaa C/laahi Yuusuf Axmed, oo ay Itoobiya taageersan tahay, waxa ay u doorteen madaxweynaha DFKMG ee Soomaaliya.

Nov 3, 2004 - Madaxweynaha DFKMG ayaa ra'iisul wasaare u magcaabay **Cali Maxamed Geedi.**

Dec 1, 2004 - Ra'iisul wasaaraha la doortay Cali Maxamed Geedi ayaa dhaariyey xukuumadiisa oo ka koobnayd 27 wasiir.

Jan 31, 2005 - Waxaa magaalada Muqdisho ay dabley hubaysani toogasho ku dileen sarkaal

Soomaaliyeed oo lagu magcaabi jirey Hersi Cumar Dhorre, taas oo loo macneeyey in lagu wiiqayey awooda xukuumada cusub DFKMG.

Feb 9, 2005 - Cusmaan Cali Caato (oo ay hay'adda Reuters ku tilmaantay: Qabqablaha Dagaalka ahna wasiir katirsan dawlada) ayaa Soomaalida waxa uu ugu baaqay in ay weerar kala hor yimaadaan ciidamada nabad ilaalinta ee taageeraya dawlada Soomaaliya, ciidamadaas oo ka imanaya dalka Itoobiya ee xurgufta taariikhiga ay ka dhaxayso Soomaaliya.

Feb 24, 2005 - Madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaraha Soomaaliya ayaa doorashadoodii kadib markii ugu horeysey ku laabtay Somaaliya, waxayna ka degeen magaalada Jawhar. Waxayna safarkaas

kusoo mareen Beledweyne, Galkacyo, Boosaaso iyo Baydhabo.

March 17, 2005: Gudoomiyaha baarlamaanka DFKMG, **Shariif Xasan Sh Aadan,** ayaa kulan uu Nairobi kula yeeshay baarlamaanka DFKMG kaga dhawaaqay in baarlamaanku isku raacay in aan Soomaaliya la keenin ciidamo ka socda wadamada safka hore, kadib markii loo qaaday cod far taag ah, waxyar ka dib markii ay suurta gali waysay dagaalna ka dhacay in codka qarsoodiga ah loo qaaddo ciidamadda safka hore in la geeyo soomaaliya, waxana soo xaadiray xildhibaano gaarayay 217 Waxaa diiday safka hore 156, waxaana ogolaatay in la keeno safka hore 55, halka 6 ka mid ahina ay ka gaabsadeen, sidaas ayaana lagu ansaxiyay in baarlamaanku diiday ciidamadda wadamada dariska la ah soomaaliya.

Kaddib waxaa baarlamaanka ka dhacay dagaal feer iyo gacan iyo laad la isla dhacay, kuraasna la isu adeegsaday, qayb xildhibaanada ka mid ah ayaana halkaas dhiig lagaga daadiyey.

April 29, 2005 - Ra'iisul wasaare **Cali Maxamed Geedi,** ayaa markii ugu horeysey u duulay caasimada Soomaaliya ee Muqdisho, si uu u xalliyo khilaafka dawlada soo kala dhex galay ee ku saabsan halka ay dawladdu degi doonto iyo arrimha la axiriira ciidamada nabad ilaalinta.

May 3, 2005 - Qarax ayaa ka dhacay garoonka ciyaaraha Muqdisho (*stadium Mogadishu*) halkaas oo uu ka khudbaynayey ra'iisul wasaare Geedi, qaraxaas oo keenay dhimasho iyo dhaawac.

May 11, 2005 - Xildhibaano tiradoodu dhan tahay 152 ayaa Nairobi ku yeeshay kalfadhi uu dalbaday

Madaxweynaha DFKMG, C/Laahi Yuusuf, kalfadhigaas waxaa Baarlamaanku ku ansaxiyey in dowladdu dagto Baydhabo iyo Jowhar iyo in ciidamo ka socda Midawga afrika (Suudaan & Uganda) (iyo carab) la geeyo Soomaaliya . Kulankaas waxaa ka maqnaa Gudoomiyaha Baarlamaanka, Shariif Xasan. Waxaa shir gudoomiye ka ahaa gudoomiye ku xigeenka labaad ee baarlamaanka, Prof Maxamad Cumar Dalxa.

May 12, 2005 - Shariif Hasan Sheikh Aaden oo ah afhayeenka Baarlamaanka KMG ayaa sheegay in uu aadi doono Muqdisho, isla mar ahaantaasna xubnaha kale ee Baarlamaanka ku qancin doono in ay u raacaan Muqdisho, halkaas oo uu sheegay in kulanka labaad ee Baarlamaanka lagu qaban doono. Waxaa si cad u soo shaac baxay kala qaybsanaanta DFKMG

ay ku kalaqaybsan tahay meesha ay degeyso dawladu: Muqdisho mase Jawhar & Baydhabo.

May 13, 2005 - Midowga Afrika ayaa Addis-Ababa kaga dhawaaqay in ay Soomaaliya u diri doonaan 1,700 oo askari, kuwaas oo ka qayb qaadanaya (ammaanka) dib u celinta dawlada Soomaaliya loogu dhisay Nairobi.

Ciidamadaas waxaa habeenimadii Khamiista (May 12, 2005) ansixiyey qaybta Midowga Afrika u qaabilsan ammaanka. Ciidankaasi waxay ka iman doonaan labaad dal ee kala ah: Ugandha iyo Suudaan.

Ra'iisul wasaaraha DFKMG, Cali Maxamed Geedi, oo marka go'aankaasi dhacayey ku sugnaa Addis-Ababa ayaa sheegay in Soomaaliya aqbashay in ciidamadaas la keeno, isla maalin ka hor ayey ahayd

markii Addis-Ababa uu ka sheegay Ra'iisul wasaraha Itoobiya in Muqdisho ay joogaan waxa uu ugu yeeray "Argaggixiso" eedayntaas oo caado u ah Zenawi oo aan marna xusin qadiyadda dhabta ah ee u dhexaysa Soomaaliya iyo Itoobiya taas oo ah: Dhul & Dad ay gumeysato Itoobiya.

Jun 13, 2005 - Dawlada FKMG oo bilowday geedi ay ugu guureyso Soomaaliya, kana guureyso Nairobi oo ay ku sugnayd 9 bilood.

MDFKMG, Cabdullaahi Yuusuf Axmed, ayaa khudbad sagootin ah waxa uu u jeediyey reer Kenya. halkaas oo ay dawladda Soomaaliya ku sugnayd ilaa markii la soo magcaabay (Oct 2004).

Waxaa halkaas kusii sagootiyey madaxweynaha kenya, Mwai Kibaki. Sagootintaas oo lagu qabtay guriga looga arrimiyo Kenya ee loo yaqaan "State

house" waxaa goob joog ka ahaa ra'iisul wasaaraha DFKMG, **Cali maxamed Geedi,** iyo xubno ka tirsan labada gole ee DFKMG.

Madaxweynaha waxa uu u safrayaa dalka Qadar, ra'uusul wasaaruhuna jawhar, baarlamaanka oo la kaladiray (June 12, 2005) iyo golaha wasiirradu waxay u safrayaan gobolada kala duwan ee dalka.

June 25, 2005: Dowlada Yeman ayaa ku guulaysan waysay in ay heshiis gaaraan Madaxweynaha iyo guddoomiyaha Baarlamaanka DFKMG, kadib wadahadalo ay dowlada Yemen uga furtay magaalada sanca ee dalka yaman.

Kulamada la isku soo hor fariisinayo madaxda ugu sarraysa DFKMG waxay yemen kadhaceen (21/6/2005) iyo (22/6/2005), inkastoo (23/6/2005) Madaxweyne C/laahi isaga keligiis uu

madaxtooyada kula kulmay madaxweynaha Yemen **Cali Cabdalla Saalax,** halka Guddoomiye Shariif Xasan uu ku qaabilay qolkii uu ka degganaa Hoteel Taaj Saba.

June 30, 2005: Ciidamo ka socda dunida Islaamka oo nabad Ilaalin ah oo loo dirayo Soomaaliya. Sidaas waxaa lagu go'aamiyey Kalfadhigi 32aad ee wasiirada arimaha dibadda ee dalalka Islaamka oo ay ka soo qayb galeen 54 dawladood oo kamid ah 56-da dal ee xubnaha ka ah Ururuka Islaamka, kalfadhigaas oo lagu qabtay caasimada dalka Yemen ee Sanca, (June 28-30, 2005), ciidamadaas oo ku shaqayn doona magaac Qaramada Midoobey (UN). Waxaa kale oo isla kulankaas lagu go'aamiyey in la sameeyo guddi ka socda ururuka Islaamka oo soo arka sida dib loogu dhisi lahaa Soomaaliya.

Januray 5, 2006: Madaxweynaha DFKMG, Cabdullaahi Yuusuf Axmed iyo guddoomiyaha Baarlamaanka Soomaaliya, **Shariif Xasan Sh. Aadan,** ayaa heshiis ku kala saxiixday magaalada Cadan ee dalka Yemen, heshiiskaas oo ah in ay soo afjaraan xurguftii u dhexeysey labada garab ee Dawlada Federaalka ee Jowhar iyo Muqdisho. Heshiiskaas in uu dhaco waxaa ku guuleystey madaxweynaha Dalka Yemen, Cali Cabdalla Saalax, oo labada garab ku casuumay dalkiisa.

January 30, 2006: Guddoomiyaha Baarlamaanka Dawlada FKMG ayaa shaaca ka qaaday in kulanka kowaad ee Baarlamaanka Soomaaliya markii ugu horeysey lagu qaban doono magaalada Baydhabo, waxana uu guddoomiyuhu markaas joogey magaalada Nairobi ee dalka Kenya.

February 11, 2006: Magaalada Gaalkacyo ayaa waxaa kulan ku yeeshay Madaxweynaha DFKMG, C/Laahi Yuusuf, Guddoomiyaha Baarlamanka, Shariif Xasan, iyo Ra'iisul wasaaraha DFKMG, Cali Maxamed Geeddi. Waxana ay kawada hadleen kulanka barlamaanka ee qorshaysnaa in uu ka dhaco Baydhabo.

February 18, 2006: Siddeed qabqable-dagaal oo badankoodu ka mid ahaa wasiirada DFKMG ayaa waxa ay asaaseen Isbahaysi ay u bixiyeen la dagaalanka "argaggixisada".

February 26, 2006: Baarlamaanka FKMG ayaa markii ugu horreysey ku kulmay Baydhabo, qabqablayaasha ka soo horjeedey dowladda ay ka tirsanaayeen ee ku dhawaaqay Isbahaysiga, kama ay soo qayb gelin kulankaas.

Baarlamaanka DFKMG waxaa Kenya lagu soo dhisay sannadkii 2004.

February 28, 2006: Muqdisho waxaa looga dhawaaqay Golaha Kacdoonka Difaaca Diinta iyo Dalka, kaas oo ay ku dhawaaqeen Midowga Maxaakiimta Islaamigu, si ay uga hor tagaan Isbahaysiga la baxay ladagaalanka "Argaggixisada."

March 21, 2006: Waxaa Muqdisho ka dhacay dagaal aad u culus, kaas oo socdey ilaa March 23keedii, dagaalkaas oo u dhexeyey Midowga Maxaakiimta Islaamka iyo Isbahaysigii la baxay Ladagaalanka "Argaggixisada", dad farabadan ayaa dagaalkaas ku dhintay, in badana guryahoodii ayey ka qaxeen.

April 21, 2006: Xubin ka tirsan Isbahaysiga labaxay la dagaalanka "Argaggixisad" ayaa sheegay in ay

dalka ka dhisi doonaan Dowlad ay iyagu maamulaan.

May 4, 2006: Madaxweynaha DFKMG, C/laahi Yuusuf ayaa Maraykanka ku eedeeyey in uu gacan siinayo Qabqablayaasha dagaalka.

May 4, 2006: Dagaal culus ayaa markale ka bilowday Muqdisho, in kastoo ay jirtey xabbad joojin.

June 2, 2006: Kumanaan tageersan Isbahaysiga Maxaakiimta Islaamka ayaa mudaharaad ku dhigay Muqdisho ay kaga soo horjeedaan Maraykanka.

June 4, 2006: Midowga Maxaakiimta ayaa qabsaday magaalada Balcad, waxaana ay ka qabsadeen Isbahaysigii la dagaalanka "Argagixisada."

June4, 2006: Ra'iisul wasaaraha DFKMG, Cali Maxamed Geeddi, ayaa xilalkii ka qaaday afar wasiir oo ka mid ahaa golahiisa wasiirada, oo ah kuwii asaasay isbahaysigii la baxay la dagaalanka "Argaggixisada, wasiirada xilka laga qaaday waxay jagooyinkoodu ahaayeen: Wasiirka Amniga Qaranka, Wasiirka Ganacsiga, Wasiirka Diinta & Awqaafta iyo Wasiirka Dhaqan Celinta Maliishiyaadka & Hubka ka dhigista - waxaana wasiirradaas laga saaray Golaha Wasiiradda Dowlada FKMG ah Ee Soomaaliya.

June 5, 2006: Maxaakiimta Islaamka ayaa ku dhawaaqay in ay la wareegeen Magaalada Caasimada ah ee Muqdisho.

Guddoomiyaha Isbahaysiga Maxaakiimta, **Sheikh Shariif Sheikh Axmed** waxa uu maalintaas yiri

"Waxa aan Muqdisho kusoo celineynaa nabadda iyo deganaanshaha. Waxaan diyaar u nahay in aan la hadalno qof kasta iyo koox kasta annagoo u danayneyna dadweynaha."

June 14, 2006: Midowga Maxaakiimta Islaamiga ayaa la wareegey Magaalada Jowhar oo xarun u ahayd Qabqablayaasha dagaalka.

Sheikh Shariif ayaa isla maalintaas la hadlay reer Jowhar, waxana uu u yiri "Waxaan idin wadnaa Kitaabka..."

June 14, 2006: Baarlamaanka DFKMG ayaa Baydhabo ku ansixiyey in Soomaaliya la keeno ciidamo shisheeye. Guddoomiyaha Baarlamaanka, Shariif Xasan Sh. Aaden, ayaa sheegay in codbixin la qaaday, waxaana in ciidamo shisheeye la keeno

ansixiyey 125 xubnood, waxaana diidey 73 xubnood.

June 15, 2006: Magaalada Beledweyne ee Gobolka Hiiraan ayaa kusoo wareegtey Midowga Maxaakiimta Islaamka.

June 15, 2006: Waxaa soo shaac baxay in Maraykanku uu Qabqablayaasha dagaalka Soomaaliya muddo 3 sano ah siin jirey lacag dhan $100,000 ilaa $150,000 bil kasta, xilli laga awood roonaaday qabablayaashii, qaarna ay ka baxeen isbahaysiga.

June 15, 2006: Magaalada New York ayaa waxaa lagu qabtay kulan looga hadlay arrimaha Soomaaliya, waxaana kulankaas lagu asaasay urur ka kooban dalalka Maraykanka, Britain, Midowga Yurub, Italy, Norway, Sweden, iyo Tanzania oo loo

bixiyey "*Somalia Contact Group*". Waxaana goob-joog ka ahaa UN iyo AU. Kulankaas laguma marti qaadin ururka Jaamacadda Carabta. Xoghaya Guud ee Ururka Carabta (Arab League), Camar Muussa oo xilligaas xilka hayey, ayaa sheegay in ay ka shiri doonaan xaaladda cusub ee Soomaaliya, waxana uu ka digey ciidamo shisheeye oo la keeno Soomaaliya.

June 22, 2006: Heshiis ayaa magaalada Khartuum ku dhex maray Midowga Maxaakiimta Islaamiga iyo Dowladda Federaalka Kumeel gaarka. shirka heshiiska lagu gaarey waxaa soo qaban qaabisay dowladda Suudaan, waxaana shir guddoomiye ka ahayd Jaamacada Carabta. Kulankaas waxaa ka qayb galay wafti kasocdey DFKMG oo uu hoggaaminayey madaxweynaha DFKMG, Cabdullaahi Yuusuf Axmed oo ay weheliyeen ra'iisul wasaaraha DFKMG, Cali Maxamed Geeddi

iyo Guddoomiha Baarlamaanak DFKMG, Shariif Xasan Sh. Aaden.

Dhanka Midowga Maxaakiimta Islaamka waftiga ka socdey waxa ay ka koobnaayeen 10 xubnood oo uu hoggaaminayey Dr. Maxamed Cali Ibraahim. Heshiiska waxaa labada dhinac u saxiixay Wasiirka Arrimaah Dibada DFKMG, Cabdullaahi Sheikh Ismaaciil iyo Dr. Maxamed Cali Ibraahim. Qodobada lagu heshiiyey waxaa ka mid ahaa:

(1) In labada dhinac ay joojiyaan hujuumka ay isku wadaan ee xagga militari iyo xagga saxaafadda.

(2) Labada dhinac uu midba midka kale aqoonsado.

(3) in la furo maxkamad la soo taagayo dembiilayaashii dagaalka (War Crime Trial).

(4) Dhawridda Midnimada Soomaaliya, iyo dhawridda wadajirka Dhulka Soomaaliya.

(5) In dadka Soomaaliyeed lagu caawiyo dib u dhiska hay'adihii qaranka, dib u dejin iyo horumarin.

June 24, 2006: Kulan aad u ballsaaran oo ay ka qaybgaleen waxgarad, Culuma'u-diin, Odoyaal iyo dad magac ku leh dalka oo lagu qabtay Muqdisho ayaa lagu magacaabay labo gole oo ah:
Golaha fulinta Maxaakiimta Islaamiga ah ee Soomaaliyeed (kaas oo bedeli doona Midowga Maxaakiimta Islaamiga ah), iyo Golaha Shuurada Soomaaliyeed(ama golaha Maxaakiimta Soomaaliyeed). Sababaha golahaan loo magacaabay ayaa ah sidii howlaha Maxaakiimta loo gaarsiin lahaa dhammaan dalka oo dhan.

Sheekh Shariif Sheekh Axmed ayaa loo magacabay Guddoomiyaha Golaha fulinta Maxaakiimta Islaamiga ah ee Soomaaliyeed, waxaana Guddoomiye ku xigeenka koowaad loo magacaabay **Sheekh Yuusuf Indha-Cadde,** Guddoomiye ku xigeenka labaadna **Sheekh C/qaadir Cali Cumar.**

Guddoomiyaha Golaha Shuurada waxaa loo magacaabay **Sheekh Xasan Daahir Aweys,** Guddoomiye ku-xigeen **Sheekh Cumar Iimaan Abuubakar**, Guddoomiye Ku-xigeenka labaadna **Sheikh C/llaahi Afrax Aasbaro**, xoghayaha Shuuradana waxaa loo magacaabay **Sheikh Maxamuud Ibraahim Suulay**. Golaha Shuurada ayaa ka kooban 88-xubnood kuwaasoo ka kala socda qaybaha kala duwa ee bulshada.

September 18, 2006: Waxaa magaalada Baydhabo ka dhacay qarax ismiidaamin ahaa oo lagu damacsanaa in lagu dilo madaxweynaha DFKMG, **Cabdullaahi Yuusuf Axmed**, waxaa qaraxaas ku dhintay dhawr qof oo uu ku jirey nin ay walaalo ahaayeen Madaxweynaha DFKMG, waxaana gubtay dhawr gaari, waxana qaraxaasi uu ka dhacay meel wax yar u jirta halka uu ka socdey kulanka golaha Baarlamaanka DFKMG oo u fadhiyey cod bixin lagu ansixinayey gole wasiirro ah oo uu soo dhisay ra'iisul wasaaraha DFKMG, kulankaas oo ahaa meeshii uu ka soo baxay **Cabdullaahi Yuusuf** in yar ka hor intii aan qaraxu dhicin.

September 24, 2006: Midowga Maxaakiimta Islaamiga ayaa la wareegey gacan ku haynta magaalada Kismaayo kaddib markii uu magaalada ka baxay wasiirkii gaashaandhigga ee DFKMG,

ahaana hoggaamiyihii Isbahaysiga Dooxada Jubba, Col. Barre Hiiraale. Waxana uu magaalada ka baxay markii ay ciidamada Maxkamaduhu soo gaareen duleedka Kismaayo, Isbahaysigii dooxada Jubbana uu u kala jabay laba garab, sidaasna ay maxkamaduhu kusoo galeen Kismaayo ayadoo aan dagaal ka dhicin.

November 26, 2006: Waa markii ugu horeysey ee Ciidamo Itoobiyaan ah oo watey ilaa 50 Tikniko ah ay galeen magaalada Gaalkacyo ee dalka Soomaaliya iyagoo ka faa'iidaysaney kala qaysanaanta Soomaalida.

December 28, 2006: Maxkamadaha Islaamiga ayaa ka Baxay Muqdisho, waxaana aarrintaas shaaca ka qaaday Sh. Shariif Sh. Axmed oo telefoon kula hadlay Telefishanka Al Jazeera, oo yiri: "Waxan

magaalada Muqdisho kasaarnay dhammaan hoggaankeenii iyo xubnihii ka hawl gelayey." Waxana uu intaas ku daray in "maxkamadaha Islaamigu ay midaysan yihiin", waxana uu ka bixidda Muqdishu ku tilmaamay bedelaad xeeladeed. Waxaa markaas magaalaada Muqdisho galay ciidamada Itoobiya.

January 1, 2007: Maxkamada Islaamiga ayaa ka baxay magaalada Kismaayo ee Gobolka Jubbada Hoose.

January 17, 2007: Baarlamaanka Baydhabo ee DFKMG ayaa kulan ay soo xaadireen 192 xildhibaan waxaa 183 ka mid ahi ay kalsoonida kala laabteen gudoomiyaha baarlamaanka **Shariif Xasan Sh. Aadan**, halka 9 ka mid ah xildhibaanadu ay arrintaas diideen, waxaana kulankaas shir

gudoominayay gudoomiye ku xigeenka baarlamaanka Cismaan Cilmi Boqore. Laakiin Shariif Xasan Sh. Aadan arrintaas gaashaanka ayuu ku dhuftay.

January 31, 2007: Guddoomiyiha Baarlamaanka DFKMG waxaa loo doortay Shiikh Aadan Madoobe.. [10-Musharax ayaa isku soo taagtay Xilka Gudoominimada Baarlamaanka waxaana markiiba iska casilay 3-Musharax, waxaana tartamay 7-Musharax iyadoo Aakhiritaankii ay isugu soo horeen 2-Musharax oo kala ah Shiikh Aadan Madoobe iyo Ibraahim Max'ed Kiish Bur, waxaana 153-cod ku guuleystay Shiikh Aadan Madoobe halka Ibraahim Kiishbuur uu ka keenay 50-cod. Hase yeeshee **Shariif Xasan Shiikh Aadan,** ayaa sheegay in uu weli yahay Guddoomiyaha Baarlamaanka DFKMG. "Xilka waxaan dhiibi karaa

markii si caddaalad ah la’iga qaado oo la raaco Dastuurka” ayuu yiri Shariif Xasan oo sheegay in Baarlamaanka Soomaaliya uu la heyste u yahay Ciidmada itoobiya. Shariif Xasan wuxuu sheegey inuu sii wadi doono howlihii dib u hashiisiinta ee uu ka dhex waday Bulshada Soomaaliyeed, waxa uuna ku tilmaamay doorashada Guddoomiyanimda ee Shiikh Aadan Madoobe mid ay ka soo shaqaysay Dowladda itoobiya, waayo waxay weligeed ku taameesay sidii uu Shiikh Aadan Madoobe uu u noqon lahaa Gudoomiyaha Baarlamaanka taasna maanta ayey fursad u heshay.

June 5, 2007: Ra'iisul wasaaraha Xukuumada Itoobiya, Meles Zenawi, ayaa magaalada Muqdisho ku tegey kulan aan hore loo sii shaacin oo qorsoodi ahaa oo saxaafadda adduunku ugu yeertay "safar kusoo bood ah"..

June 8, 2007: Aadan Cabdulle Cusmaan "Aadan Cadde", madaxweynihii ugu horeeyey ee Soomaaliya, ayaa ku geeriyooday magaalada Nairobi. (Aadan Cadde waxa uu noolaa intii u dhexeysey 1908 ilaa June 8, 2007).

October 29, 2007: Cali Maxamed Geeddi ayaa iska casiley ra'iisul wasaaranimadii DFKMG, kaddib markii khilaaf soo kala dhex galay Geeddi iyo C/laahi Yuusuf. Markii dambe Geeddi waxa uu sheegay in sababta khilaafk ay sal u ahayd Batroolka Soomaaliya. Geeddi waxa uu ra'iisul wasaare u ahaa DFKMG intii u dhexeysey November 3, 2004 ilaa October 29, 2007.

November 4 - 10, 2007: Waxa uu ahaa toddobaad ay ciidamada Itoobiya magaalada Muqdisho ka geysteen xasuuqii ugu darnaa, iyadoo wararka qaar

sheegeen in hal maalin la diley dad shacab ah oo gaaraya ilaa 50 qof.

November 22, 2007: Col. Nuur Xasan Xuseen (Nuur Cadde) ayaa loo magacaabay ra'iisul wasaaraha DFKMG, waxaana lagu dhaariyey Baydhabo Nov 24, 2007.

December 2, 2007: Col. Nuur Cadde ayaa soo magacaabay golihiisa xukuumadda oo ka kooban 73 xubnood oo isugu jira 31 wasiir, 11 wasiiru dawlo iyo 31 wasiir xigeen. Maalintii xigtey waxaa soo baxay in wasiirro uu magacaabay ay is-casileen iyagoo tilmaamay in markii la soo magacaabay aan lala tashan iyo in aan magacaabista wasiirrada la waafajin nidaamka 4.5 ee ay ku salaysan tahay DFKMG ee awood qaybisga Qabiilooyinka, waxaa kale oo soo shaac baxay in beelo Soomaaliyeed

aysan ku qanacsanayn habka loo soo dhisay golaha wasiirrada.

Col. Nuur Cadde safarkiisii ugu horeeyey waxa uu Dec 5, 2007 ugu ambabaxay magaalada Addis Ababa.

December 2, 2007: Hay'adaha u dooda xuquuqda Insaanka ayaa sheegay in sannadka 2007 tirada dadka Soomaalida ah ee lagu dilay Soomaaliya in ay gaareyso ilaa lix kun (6000) oo qof. (Tirada la diiwaan geliyey waa 5,930 oo dhimasho ah, 7,980 oo dhaawac ah iyo 717,784 oo barakacay.)

December 29, 2008: Waxaa xilka madaxweynaha DFKMG iska casiley Cabdullaahi Yuusuf Axmed.

January 30, 2009: Kulan ay xubnaha Baarlamaanak DFKMG ku yeesheen Jabuuti, ayaa waxaa

madaxweynaha DFKMG loo doortay **Shariif Sheikh Axmed**. Murashaxii xigey ee codadka badan ka helay baarlamaanka waxa uu ahaa

Maslax Maxamed Siyaad Barre, oo uu dhalay madaxweynihii saddexaad ee Jamhuuriyaddii Dimoqraadiga Soomaaliya.

Feruary 13, 2009: Madaxweynaha DFKMG oo ku sugnaa Jabuuti ayaa ra'iisul wasaaraha DFKMG **waxa uu doortay Cumar Cabdirashiid Cali Sharmaarke**, oo uu dhalay madaxweynihii labaad ee Jamhuuriyaddii Soomaaliya, C/rashiid Cali Sharmaarke oo la diley Oct 15, 1969.

14/octoobar,2010, waxaa raysul-wasaare loo magacaabay max,ed c/laahi farmaajo.waxa uuna noqday raysul-wasaarihii labaad ee dowladda sh/shariif sheikh axmed.

Juun 23,2011, waxaa raysul-wasaare loo magacaabay c/wali gaas.

10-sebtembar 2012, waxaa doorashada madaxtimada dalka ku guulaystay Xasan Sheikh Max,uud.

6/10/2012, waxaa jagada raysul-wasaaraha madaxweynuhu u magacaabay **cabdi faarax shirdoon saacid.**

2/Diseembar,2013, waxaa xilka ka tegey raysul-wasaare shirdoon. Kadib khilaaf dhexmaray isaga iyo madaxweynaha.

Diseember 12, 2013. Waxaa jagada raysul wasaaraha dalka loo magacaabay C/ wali sheikh Axmed max,ed.

Diseembar 6, 2014, waxaa baarlammaanku kalsoonida kala noqday R/ cabdi wali sheikh axmed

.

17/diseembar 2014, waxaa madaxweyne xasan sheikh max,ud uu rayasul wasaare u magacaabay cumar c/rashiid cali sharmaake oo markii labaad xilkaas qabtay.

DHAMMAAD

Waxaa qoray: Xuseen Axmed Salaad.

Macallin , ahna qoraa soomaaliyeed.

Tusmada buugga

rsi	**Mowduuca**	**begga**
1.	Hordhac	1
2.	**Cutubka kowaad:** juquraafiga dalaka	2
3.	Bedka dalka iyo dadka	3
4.	Dhulbeereedka	3
5.	Dalagga ka baxa soomaaliya	4
6.	Qaab-dhismeedka oogada dhulka soomaliya	7
7.	Wabiyada soomaaliya	8
8.	Dhirta ka baxda soomaaliya	12
9.	Ilaha biyaha ee soomaaliya	15
10.	Waa maxay biyo la’aanta?	16
11.	Goboollada iyo degmooyinka dalka	21
12.	Dhaqaalaha iyo cimilada	30
13.	**Cutubka labaad:** taariiqda dalka ka hor 1960kii.	32
14.	Asalka soomaalida	32
15.	Maamulladdii soomaray soomaaliya	37
16.	Soomaaliya iyo islaamka	39
17.	Iridaha islaamku ka	42

	soogalay soomaaliya	
18.	Magaaloyinka ugu da,da weyn soomaaliya.	43
19.	Soomaaliya oo shan qaybood loo qaybiyey	44
20.	Dagaalladii soomaalidu lagashay gumaystaha	47
21.	Halgankii AXMED GURAY	48
22.	Halgankii xasan barsane	49
23.	Sayid max,ed c/lle xasan.	51
24.	Halgankii s.y.l	53
25.	**Cutubka sadaxaad. Taariiq 1960kii ka dib.**	57
26.	25 kii golaha sare ee kacaanka.	61
27.	**Dilkii culumada soomaaliyeed**	64
28.	Jaamacaddii lafoole	71
29.	Maalmaha woddaniga ah oo laxuso	73
30.	Burburkii dawladdii max,ed siyaad ka dib	74- 113.
31.		